

**Badbaadadiina
Ilaaliya, Kuwa Lugta
Ku Soconayow iyo
Kuwa Isticmaala
Kabaha Giraangirta
ah!**

Socodka iyo isticmaalista kabaha giraangirta waa habab aad u wanaagsan oo lagu soo wareego. Waxay caawiyaan meeraha, waxay badbaadiyaan lacag, waana jimicsi fiican.

Xusuusnoow in aad wadooyinka la wadaagto baabuur kala duwan sida gawaarida, baaskiiladaha, iyo mootooyinka. Qof kasta waxaa mas'uuliyad ka saaran inuu midba midka kale ilaaliyo badbaadadiisa. Halkaan waxaa ku yaala dhowr tallooyin oo kaa caawinaya inaad badbaado ku joogto markaad soconayso/isticmaalayso kabaha giraangirta leh:

**Isticmaal Marinka
Wadada Dhiniciisa Mara**



**Si badbaado leh u
Soco/U Isticmaal Kabaha
Giraangirta Leh**



**Ka gudba jidadka
adigoo isticmaalaya
meelaha loogu talagalay**



**Ka Digtoonoo
Wadooyinka Baabuurta/
Goobaha Baarkinada**




**Qaado Lebbis La Arki
Karo**



Isticmaal Marinka Wadada Dhiniciisa Mara

Haddii uu jiro marin waddada dhiniciisa mara, isticmaal marinkaas! Haddii waddadu aysan lahayn marin dhinac mara, ku soco/kabaha giraangirta leh ku isticmaal dhanka bidix ee wadada oo wajigaaga ku aadi dhanka ay gaadiidka ka imaanayaan si aad u aragto baabuurta iyo darawalada soo socda.



Si badbaado leh u Soco/U Isticmaal Kabaha Giraangirta Leh



Had iyo jeer adeec calaamadaha iyo astaamaha waddooyinka. Ha ku cararina, ha ku ciyaarina, hana isku riixriixina gawaarida agtooda, oo had iyo jeer meel fog iska dhig taleefanada iyo sameecadaha dhegaha la gashado marka aad markaad soconayso/isticmaalayso kabaha giraangirta leh.

Ka gudba jidadka adigoo isticmaalaya meelaha loogu talagalay

Had iyo jeer ka gudub waddo adigoo isticmaalaya meelaha calaamadaysan ee loogu talagalay in wadada looga gudbo. Iska eeg baabuurta ka soo socota dhamaan jihooyinka, oo ay ku jiraan kuwa bidix ama midig u leexanaya. Haddii aysan jirin meel calaamadaysan oo looga gudbo wadada, raadi meel iftiin fiican leh oo si fiican looga arki karo dhamaan gawaarida isticmaalaysa waddadaas.



Ka Digtoonoo Waddooyinka Baabuurta/Goobaha Baarkinada



Iska ilaali baabuurta soo galaysa ama ka baxaysa dariiqyada baabuurta ama galaya baarkinka.

Qaado Lebbis La Arki Karo

Ka fakar waxa aad ku lebbisanayso markaad soconayso/isticmaalayso kabaha giraangirta leh. Way ku adag tahay darawaladu inay ku arkaan marka ay mugdi tahay, sidaas daraadeed xiro dhar midabyo dhalaalaya leh marka ay suurto gal tahay. Habbteenkii, xiro dhar milicsi leh ama soco/isticmaal kabaha giraangirta leh adigoo wata wax ifiyo.

